


Laf-ahaantaada iska qaad shaybaarka

Iska qaadista shaybaarka kahor aqriso dardaaranka

Shaybaarka awgiis waxyaalahaan ayaa u baahan tahay:

- Bac wayn oo la xiri karo [zip-lock] oo ay ku jiraan:
 - qoriga yar ee shaybaarka
 - tuubada shaybaarka ku dhex jirto dareere cusbo leh
 - bac yar oo la xiri karo [zip-lock] oo ay ku jiraan tuwaal xaansho ka sameeysan oo xilliga gaadiidka loogu talagalay amniga shaybaarka.
- Koob ama saxank
- Bac qashinka lagu tuuro iyo istiraasho.




Diiwan-geli shaybaarka

- Guda-gal direkttest.se, xulo "Registrera prov" kaddib qor lambar-ka tixraaca oo ka kooban tobban lambarro, kuwaasoo ku qoran sumadda.

Haddii kale

Adigoo mobaylkaaga adeegsanayo skan ku sameey koodka-QR (tuubada shaybaarka ama bac yar oo la xiri karo [zip-lock]). Sida aad ku dabagasho isku-xireha guji/riix afargeysta shaashada kaaga muuqata.

- Ku qor warbixintaada kaddib tixraac tallaabooyinka idil. Haddii shaybaarka aad samaynayso kaddib markii qofka madaxa ku ah aad heshiis la gashay, qor koodka goobta shaqada.
- Kaddib markii adigoo adeegsanayo aqoonsiga loo yaqaanno [BankID] aad ku xaqijiso aqoonsigaaga diiwan-gelinta waa diyaar.
- Dib ugu noqo dariishada weebka, waxaa shaashada direkttest.se kaaga muuqan doono iveryada "Ditt prov är nu registrerat".



Dyaarinta shaybaarka kahor


Miiska saaro tuubada shaybaarka iyo qoriga yar ee shaybaarka. Tuwaalka xaanshida ka sameeysan ha ka soo saarin bacda yar oo la xiri karo [zip-lock].

Imminkaa shaybaarka iska qaad

Adigoo adeegsanayo qaybta kor ee jilican ee qoriga yar ee shaybaarka, waxaad shaybaarka ka soo qaada cunaha, sanka iyo candhuufa, qaab hoos ku xusan:

- Qoriga yar ee shaybaarka afkaaga geli kaddib ku riix ilaa dhuunta inta aad kari karto. Qaddar ka kooban 10 ilbiriqsiyo qoriga yar ku xoq gidaarka cunaha.
- Kaddib isla qoriga yar geli duleelka sanka dhawr sentimiitir ku wareeji/ku xoq 10–20 ilbiriqsiyo.
- Kaddib saxanka ama koobka candhuuf ku tuf, candhuufta ka ilaa-li xab iyo duuf. Qoriga yar dhexgeli candhuufta ilaa u aad qoyaan ugu noqdo. Markii aad furayso tuubada shaybaarka qoriga yar ku dhaaf saxanka ama koobka.

- Qoriga yar dhexgeli tuubada shaybaarka, kaddib qaddar 20 ilbiriqsiyo qoriga yar ku dhex wareeji, kahor inta aad qoriga yar aad ku tuurin bacda qashinka, kaddib si fiican daboolka ugu xir tuubada shaybaarka.
- Tuubada shaybaarka dhex geli bacda yar oo la xiri karo [zip-lock] kaddib si fiican u xir.
- Kaddib bacda yar oo la xiri karo [zip-lock] dhex geli bacda wayn oo la xiri karo [zip-lock] kaddib si fiican u xir.
- Kaddib shaybaar soo gudbi. Haddii shaybaarka aad durbadiiba soo gudbin karin ku kaydi qaboojiyeha fudud ilaa aad iska gud-biso.



Tuur qashinka

Qoriga yar ee shaybaarka iyo koobka/saxanka hal mar la isticmaalo ku tuur bacda qashinka kaddib isku xir. Saxanka iyo koobka guriga caadi ahaan ayaa loo dhaqi karaa.

Bacda qashinka ku tuur halka qashinka raashinka lagu tuuro (qashinka la gubi karo).

Jawaabta shaybaarka

Mudadda aad jawaabta shaybaarka sugayso, waa inaad guriagaaga iska joogta, laguma oggola inaad goobta shaqada, waxbarashada iwm aado. Markii goobaha dibada aad ku sugar tahay, waa inaad tixgelisa musaafada/kala durugsanaanshada ee uu qofka kale ku jiro (taasoo ah 2 miitir). Sidoo kale, mudadaas laguma oggola inaad adeegsado gaadiidka dadwaynaha. Guud ahaan waa inaad u dha-qantaa sidii adigoo cudur-faafinta dadwaynaha ka ilaalinayo.

Markii jawaabta shaybaarki ay diyaar tahay waxaa lagugu wargelin doonaa farinta sms. Taasoo caadi ahaan dhici doono 48 saacadood gudahooda, laga soo bilaabo saacadda shaybaarka aad soo gudbisay, laakin in ka badan ayay qaadan kartaa haddii aad soo gudbisa xilli ku beegan sabti/axad/maalin fasax ah. Adigoo adeegsanayo aqoonsiga loo yaqaanno [BankID] aaya guda-geli kartaa barta internetka direkttest.se kaddib aqrisan kartaa jawaabta.